

Xaashida Xogta Xeerka Cuntada #33

Waxay tahay inaad ka ogaato xeerka

WWW.HEALTHOREGON.ORG/
FOODSAFETY

Nadiifinta Taangiga Maqaayadda Cuntada Wareegta

**OAR 333-150-0000,
CUTUBKA 5-
304.15**

5-304.15 Nadiifinta Taangiga Biyaha.

(A) Taangiyada biyaha la cabbi karo ee maqaayadda cuntada wareegta waa in loogu talo galaa in la gaadhi karo oo wax ku jira la arki karo si markaa dusha looga arki karo inuu nadiif yahay marka la kormeerayo. Maqaayadda cuntada wareegta ee liisanka la siiyey wixii ka horeeyay Febraayo 1, 2020 loogama baahna inay buuxiyaan shuruudahan.

(B) Taangiyada biyaha la cabbi karo iyo kuwa biyaha wasakhda ah waa in la nadiifiyaa ugu yaraan lix bilood kasta ama siday amartay warshada samaysay.

SABABO

CAAFIMAADKA

SHACABKA AH:

Maqaayadda cuntada wareegta ee taangiyada biyaha cabitaanka iyo wasakhda waa in si joogto ah loo nadiifiyaa si loo baajiyo ili-ma-aragtayga ku dhalanaya ama inay fadda-roobaan.

Waxaa muhiim ah in la nadiifiyo taangiyadda biyaha la cabbi karo ee maqaayadda cuntada wareegta badanaa si markaa aad u ogaato in biyaha aad isticmaalaysaa ay nadiif yihiin. Taangiyada biyaha waxaa ku dhalan karta baakteeriyada mudo kadib ay macaamiishu ku xanuunsan karaan.

Taangiyada biyaha nadiifta ah iyo bulaacada waa in la nadiifiyaa ugu yaraan lix (6) bilood ama wax ka yar hadii warshada taangigu ay sheegtay sidaas.

Waxyaabo ay tahay inaad ku xisaabtanto kahor inta aanad bilaabin nidaamka nadiifinta:

- Waxa aad buuxinaysaa taangi-gaaga biyaha nadiifta ah oo dhan oo waxa aad ka daadinaysaa laba jeer (mar biyo koolooriin leh iyo mar biyo nadiif ah oo lagaga dhaqdhaqayo).
- Waxay noqonaysaa inaad ku sugnaato meel biyaha lagu daadiyo oo la ogol yahay ama inaad diyaarsato biyo-tuure liisan haysta si aad biyaha uga daadiso taangiyada bulaacada wakhtiga aad nadiifinayso.
- Biyaha leh koolooriinta, waxa aad isticmaali doontaa milaan loo yaqaan sodium hypochlorite, oo ay ku jiraan 5-8% oo koolooriin ah (ama jaafeel). Waa inaad isticmaashaa jaafeel saafi ah, aan waxba lagu darin. Biyaha leh koolooriinta waa inay dhawr saacadood ku jiraan taangiyada, markaa waa inaad ku shubtaa marka aanad shaqaynaynin.

- Waxa aad dhigtaa meel siman qalabkaaga si markaa dhamaan qaybaha taangiyadaada si siman ay ugu nadiifsamaan.

Si aad u nadiifiso taangiyadaada, waxaa loo baahan yahay inaad buuxiso taangiga biyaha nadiifta ah oo aad ka daadisaa laba jeer: mar biyo leh koolooriin iyo mar biyo nadiif ah si aad ugu dhaqdhaqdo. Ka eeg bogga 2 wixii tilmaamo gaar ah.



Taangiyada biyaha nadiifta ah waa in wax laga dhax arki karaa oo si fudud gaadhi karaa. Taangiyada waa in aan laga furin qaybta.

Raac tilmaamaha warshada iyo shuruucda deegaanka marka aad nadiifinayso taangiyada gurigaa-wareega. La hadal kormeerahaaga wixii su'aalo ah ee aad qabto. Si joogto ah u ilaalinta ayaa si munaasab ah u nadiifinta ayaa xaqiijisa in aad marwalba siinayso biyo amaan ah macaamiishaada. ter to your customers.

